SHIRKA CAALAMIGA AH EE KU SAABSAN BURCAD-BADEEDNIMADA KA JIRTA SOOMAALIYA:

BAAQ

Shirkii caalamiga ahaa ee ku saabsanaay burcad-badeednimada ka jirta Soomaaliya, ayaa asaga oo Heer Wasiir ah la qabtay 11kii Diseembar 2008. Waxaa hadalkii furitaanka jeediyey Mudane, Madaxweyne ku-xigeenka Kenya, Kalanzo Musyoka. Shirka waxaa wada-shir gudoomiyey, Mudane Moses Wetangula, Wasiirka Arrimaha Dibada Kenya iyo Ahmedou Ould-Abdullah, Ergygga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qarammadda Midoobay.

Wasiiradu:

- Waxay amaaneen dadaalka wadamadda, Urur Gobaleedyada, CTF 150, NATO iyo Hawlgalka Midawga Yurub- Atalanta ee bilaawday 8dii Diseembar 2008.

- Waxay canbaareeyeen dhammaan falalka burcad-badeednimo iyo dhaca hubeeysan ee loo geeysanayo maraakiibta maraysa biyaha Soomaaliya, Gacanka Cadan iyo marin-biyoodyada ku yaala Xeebaha Bariga Afrika. Waxay soo dhoweeyeeyn qaraarada Golaha Amaanka ee tirsigoodu kala yahay 1814 (2008), 1816 (2008) 1838 (2008) iyo 1846 (2008), waxaa kale ee ay soo dhoweeyeen dadaalada Wadammada, kan Urur-gobaleedyada, kuwa heerka caalamiga ah, loogana soo hor jeedo falalka burcad-nimo, ayada oo la raacaayo qaraarada aan soo sheegnay iyo shirka soo socda ee Golaha Ammanka lana xariira falalka burcadbadeednimada ee ka jirta Soomaaliya.

- Waxay ku nuuxnuux-sadeen muhimada ay leedahay in horey loo mariyo habka isku-xirka iyo iskaashiga ku salaynsan, loogana soo hor jeedo burcad-badeednimada, waxayna soo dhoweeyeen dadaaladii beryahaan-denbe ay wadamada iyo ururada qaarkood ay ka sameeyeeyn habkii ay arrimahaan isaga kaashan lahaayeen. Wadamada ay arrintaani khusayso waxay go'aan ku gaareen in ay iskaashi ka sameeyaan dhexdooda, sida oo kalana ay iskaashi ula sameeyaan Urur-gobaleedyada iyo kuwa Caalamigaba ah sida Ururka caalamiga ah ee Marrin-biyoodyada, kan maraakiibta, si loola dagaalamo burcad-badeednimada, wax-na looga qabto falka burcad-badeednimada ee badaha dhexdood ka jira, sida oo kalna wax looga qabto meelaha falkaani ka uu soo unkamaayaan sida berriga. Waxaa kale oo ay ka mahad celiyeen talo soo jeedintii 10kii Diseembar 2008 ee Gudiga Khubaradooda (sida ku cad lifaaqaan).

- Waxaa kale oo ay carabka ku adkeeyeen in aanaan si waarta loo xalin-karin dhibaatada burcad-badeednimada ka jirta Soomaaliya ila iyo inta ay ka soo noqoneyso nabadgelyada, xasiloonida iyo dawlad shaqeeysaba. Sidaas darteed, waxay soo dhoweeyeen Heshiiskii Jabuuti ee dhexmaray Dawladda Federalka Ku-meel Gaarka ah iyo Isbaheysiga Dib-uxureynta Soomaaliya ee 19kii Agoosto 2008, waxaaa kale ee ay aad u ifiyeen baahida loo qabo in bulshada caalamku ay bixiso kaalmo dheeraad ah. Waxay mar labaad ugu

baaqeeyn dhinacyada Soommaaliyeed iyo bulshada caalamku-ba in ay si buuxda u hirgeliyaan Heshiiskii Jabuuti. Ayaga oo maanka ku haya in xoojinta iyo balaarinta Heyadaha Ku-meel-gaarka ee Federaaliga ah iyo dedeg-wax-uga qabashada arrimaha nabadgelyada ee dalka ay muhim u yihiin dhimista falalka burcadbadeednimada ee ka baxasan Soomaaliya, waxay ugu baaqeen dhamman dhinacyada kale ee Soomaaliyeed oo ay arrintu khusesaydo in ay canbaareeyaan nabadgelyo-xumada, kuna soo biiraan geedi socodka nabadda ee Jabuuti, kaas oo u furan dhamman dhinacyada.

- Madaxda Soomaaliyeed ee carqaladeeya habka nabadaynta wadankooda iyaga oo abuuraaya xaalado ay ku koraan kuna bulaalaan falka burcad-badeednimada leh, waxaa lagu soo rogayaa cuna-qabateen si keli-kelinimo iyo wadajirba leh, waxaana soo rogaya Uruka Midowga Afrika iyo IGAD, taas oo waafaqsan qaraarka Golaha Amaank ee tirsigiiso yahay 1844, 2008.

- Waxay hoosta ka xariiqeen baahida loo qabo in la xoojiyo awoodda Dawladda Soomaaliyeed iyo Kuwa Gobalka ka jira, si loola dagaalamo burcad-badeednimada, kajirta burcad-badeednimada badaha dhexdooda, isla markaasna talaabo sharci ah looga qaado burcad-badeedda marka ay ku soo laabtaan berriga ama xeebaha-ba. Waxay dib isula xaqiijiyeen inay badaha Soomaaliya ay ka madax-banaan yihiin ama ka reeban yihiin ka kaluumeeysiga sharci-darada ah iyo ku- qubida wax-yaalaha kiimikada ah iyo waskheynta kaleba. Waxaa kale oo ay canbaareeyeen ku soo qulqulka hubka, maan-dooriyayaasha iyo daadgureeynta iyo soo dusinta dadka qaxooti doonka ah oo ay ku howshooyihiin kooxaxa dhagar-qabayaasha ah kana jira dhammaan badah dalka Soomaaliyeed, sidaas darteed waxay isla go'aan sadeen in ay talaabo adag ka qaadan dhamaan kuwa ku mashquulsan wax-u dhimista nabadda iyo xasiloonida Soomaaliyeed.

- Waxay dareen xoog leh ka muujiyeeyn dhaqanka ku fadhiya 'impunity'-denbi gal hadana iska soco iyo sii xumaashaha foosha ba'an ee xuququl insaanka iyo xalada bani'aadanimo ee ka jirta Soomaaliya. Sidaas darteed waxay ugu baaqeen Wadamadda Aduunka, Urur gobalyeedyada iyo kuwa Caalamiga ah-ba in ay horay Umariyaan Habka war-isdhaafsiga iyo isla xiririnta hawlgalka maraakiibtooda si si dhab ah loogu badbaadiyo shixnadaha sida kaalmada, isla markaasna ay u geeyaan mucaawinada ay sidaan dekedaha Soomaaliyeed waqtiga ku haboon. Talaabadaan waxaa loo marayaa xakameenta dhaqdhaqaaqooda maaliyadeed ee burcad babeedda.

- Waxaa kale oo ay hoosta ka xariiqeen baahida oo qabo in la taageero Wadamada Gobalka iyo Urur Gobaleedyada, si loola dagaalamo burcad-badeednimada iyadoo loo marayo adkeenta Sharciga Badaha iyo Berriga ka jira. Sidaas darteed, waxay ku heshiiyeen bixinta taageerada farsamo ee loo baahan-yahay si loo huromariyo arrimaha badda iyo awoda sharci ee dhamman wadamada Gobalka kuwaas oo burcad-badeednimmada si toos ah wax ugu geeysato. Intaa waxaa dheer, Wasiiradu waxay ugu baaqeeyn Urur Gobaleedyada iyo kuwa Caalamiga ah-ba in ay iskaashi la sameeyaan wadamadda ay arrintu khusayso si loo hormariyo awoodooda la dagaalanka masiibdaan.

- Waxay u mahad celiyeen qabanqaaba-yaasha shirka iyo Dawladda Kenya, oo ah wadanka marti geliyey shirka.

Nairobi, 11 Diseembar 2008